Bogga Warbixinta Oo U Socda Bukaanka iyo Waalidiinta/ Xanaaneeyeyaasha
(Fact sheet for Patients and Parents/Caregivers)

Oggolaanshaha degdegga ah oo fasaxaayo in daawada Remdesivir loo isticmaalo cudurka koroonofayraska 2019 (COVID-19)
(Emergency Use Authorization (EUA) Of Remdesvir for Cononavirus Disease 2019)

Waxaa lagu siin rabaa daawo la yiraahdo remdesivir sidii lagu daaweeyo cudurka koroonofayraska ee 2019 (COVID-19). Boggan warbixinta ah waxaa ku yaal macluumaad kugu caawinaaya fahanka waxyeelooyinka iyo faa'idooyinka qaadashada remdesivir, oo ah daawo aad hore u qaadatay ama ay dhici karto in lagu siyo.

Ma jirto daawo ay weli ansaxisay U.S.Food and Drug Adminstration (FDA) kaas oo ah maamulka ansaxiya daawooyinka iyo cuntooyinka ee Maraykanka. Qaadashada remdesivir waxay waxtar u lahaan kartaa dadka qaar ee isbitaalka ku jira ee qaba cudurka COVID-19. Aqri boggaan ku qoran macluumaadka remdesivir. La hadal dhaqtarkaaga haddii aad su'aalo qabto. Waa go'aankaaga inaad qaadato remdesivir, ama aad waqtigaad rabto iska joojiso qaadashadeeda.

Waa Maxay COVID-19?
(What is COVID-19?)
COVID-19 waxaa keena fayras la yiraahdo koroonofayras. Nooca koroonofayraskaan hadda ka hor weli looma arkin. Koroonofayraskaan cusub waxaa koow laga helay dadka ku nool magaalada Wuhan ee gobolka Hubei ee waddanka Shiinaha bishii Diseembar, 2019. Inay aadanaha isku gudbin karaan waxaa laga soo wariyay Hubei banaankeeda iyo waddamada ka baxsan Shiinaha, oo uu ka mid yahay waddanka Maraykanka. Waxaad COVID-19 ka qaadi kartaa qof qaba fayraskaas.

Jirooyinka uu keeno COVID-19 waxay u dhexeeyaan kuwa aan sidaas u darnayn (kuwaas oo ka mid ah in xitaa calaamado xanuun uu qofka isku arkin) iyo kuwo aad u daran oo keena jirro sababta dhimasho. Inkastoo macluumaadka laga ogyahay COVID-19 uu tilmaamaayo inuu keeno jirro aan darnayn, isla mar ahaantaas wuxuu keeni karaa jirrooyin qatar ah oo sababi karo in jirrooyinkii aad hore u qabtay ay kasii daraan. Dadka da'da ah iyo dadka iskugu jira da' kasta ee qaba jirro daran oo soo jireen ah (karoonik), tusaale ahaan, cudurka wadnaha, cudurka sambabaha iyo sokoroowga (kaadi-macaan), waxay halis aad ah ugu jiraan in isbitaal loo dhigo cudurka COVID-19 dartiisa..

Maxay Yihiin Calaamooyinka COVID-19?
(What are the symptoms of COVID-19)
Calaamooyinka COVID-19 waa qandho, qunfac, dhibaato neefsasho, kuwaas oo soo bixi kara inta u dhaxayso 2-14 beri gudahooda kadib qofka markuu cudurka ku dhoco. Jirrooyin halis ah oo ay ka mid yihiin dhibaatooyinka neefsashada ayaa qofka ku dhici kara oona sababi kara in jirrooyinkii uu horay qofka u qabay ay kasii daraan.

Waa maxay remdesivir?
(What is remdesivir?)
Remdesivir waa daawo fayras-ka-hortag ah oo baaris ku socoto sidii loogu daawayn lahaa dadka qaar ee qaba cudurka COVID-19 ee jiifa isbitaalka. Remdesivir weli baaris ayaa ku socota sababtoo ah weli waxbarasheeda ayaa lagu guda jiraa. Way xaddidan tahay warbixinta laga og yahay amaankeeda iyo waxtarkeeda sidii loogu isticmaalo remdesivir daaweynta dadka isbitaala jiifa ee qaba COVID-19. Waxaa la arkay in markii remdesivir lagu tijaabiyay dadka qaar ay yaraatay muddadii ayku qaadan lahayd inuu qofka cudurka haayo uu kaga kabsado. Ma jirto daawo ay FDA weli oggolaatay in amaankeeda iyo waxtarkeedaba uu daaweyn karo dadka isbitaalka jiifa ee qaba COVID-19. Sidaa daraaddeed, FDA waxay fasaxday isticmaalka degdegga ah ee remdesivir sidii lagu daaweeyo COVID-19 iyadoo cuskatay qodobka Emergency Use Authorization (EUA) oo ah fasaxa isticmaalka degdegga ah. Sidii macluumaad dheeraad ah aad uga ogaato wixii ku saabsan EUA, fiiri qaybta ugu dambaysa boggaan ee la yiraahdo **"Waa maxay Emergency Use Authorization (EUA)?**

Waa maxay waxyaabaha aan u sheegi karo dhaqaatiirta intaanan qaadanin ka hor remdesivir?
(What should I tell my healthcare provider before I receive remdesivir?)
U sheeg dhaqaatiirtaada xaaladahaaga caafimaadka, kuwaas oo ka mid:

- Wixii aad alerji (xasaasiyo) ku qabto oo dhan.
- Haddii aad qabto dhibaato kelyaha ama beerka ah
- Haddii aad uur leedahay ama aad ku talagalaysid inaad uur yeelato
- Haddii aad naasnuujinaysid ama inaad naasnuujiso aad ku talo jirto
- Haddii aad jirro qatar ah aad qabto
- Haddii aad qaadanayso daawooyin nooc kastaba ha noqdaane (daawo dhaqtar qoray, kuwa dukaamada lagu gado, fitamiino, daawooyinka dhirta laga sameeyo).

Qaabkee ayaa la'ii siin doonaa daawada remdesivir?
(How will I receive remdesivir?)
Remdesivir waxaa layska siyaa xididka (xididka gudahiisa ama IV), waxaana laysa siyaa maalintii hal mar waxayna socon kartaa ilaa iyo 10 beri hadba siduu dhaqtarkaaaga ugu maleeyo inay kuugu habboon tahay. Remdesivir wax yaraynaysaa tirada koroonofayraska ee jirkaaga ku jira. Waxaa dhici karta inay kugu caawiso inaad si dhaqso ah aad oga bogsato.

Maxay yihiin waxyeelooyinka muhiimka ah ay remdesivir keeni karto?
(What are the important possible side effects of remdesivir?)
Remdesivir dhibaatooyinka ay keeni karto waxay yihiin:

- Isbaddalada ku dhaca jirka ee ka yimaada daawo kasto oo xididka laga qaato. Isbaddalada jirka ku dhaca ee ka yimaada daawo kasto oo xididka laga qaato waxaa la arkay waqtiga remdesivir xididka layska siinaayo ama wax yar ka dib markii remdesivir lays siiyo. Calaamadaha iyo xanuunada la xiriira Isbaddalada jirka ku dhaca ee ka ka yimaada daawo xidid ka qaadashada waxaa ka mid noqon kara: cabbirka dhiigga oo hoos u dhaca,, labbo-labbo, matag, dhidid iyo qarqaryo.
- Waxay kordhisaa dheecaamada beerka. Kororka dheecaamada beerka ayaa waxaa lagu arkay dadka qaatay remdesivr, taas oo tilmaan u ahaan karta xanuun ama dhaawac gaaray unugyada beerka. Dhaqtarkaaga wuxuu kaa qaadi doonaa baaritaan dhiigag si uu u baaro beerkaaga intii aan remdesivir lagu siinin iyo maalin kasta inta aad remdesivir qaadanayso.

Kuwaan kaliya ma'aha dhamaan waxyeelooyinka ka imaan kara remdesivir. Remdesivir weli waxbarasho ayaa ku socota sidaa darteeda waxaa dhici karta in halisteeda aan kuli la wada ogayn waqtigan xaadirka ah.

Dad badan ma qaadanin daawada remdesivr. Waxyeelooyin halis ah ama lama filaan ah ayaa ka imaan kara. Daawo kasto oo laga qaato xididka waxaa dhici karta in meesha la duray ay u keento xanuun waqti gaaban socda, dhiig inuu boxo, meesha la duray oo dhaawacanta, danqasho, barar, iyo inuu infekshan (caabuq) galo meeshii la duray.

Ma jiraa noocyo kale oo daawayn ah?
(What other treatment choices are there?)
FDA waxay oggolaan kartaa isticmaalka degdegga ee daawooyin kale, sida remdesivr, sidii loogu daaweeyo dadka isbitaalka jiifa ee qaba COVID-19. Booqo www.cdc.gov/COVID19 wixii ku saabsan macluumaadka isticmaalka degdegga ah ee daawooyinka kale oo aanay weli FDA oggolaanin sidii lagu daaweeyo dadka jiifa isbitaalka ee qaba COVID-19. Waxaa suurto gal ah inuu dhaqtarkaaga kaala hadlo wixii ku saabsan daawooyinka tijaabada ku socota oo suurogali karta inaad hesho.

Inaad qaadato remdesivir ama inaadan qaadaninba waa go'aankaaga. Haddii aad go'aan ku gaarto inaadan qaadanin ama aad iska istaajiso qaadashaeeda, wax ay ka baddalayso ma lahan tayada daryeelka caafimaadka laguu qaban lahaa.

Maxaa dhacaaya haddii aan go'aan ku gaaro inaanan qaadanin remdesivir?
(What if I decide not to take remdesivir?)
Haddii aadan qaadan remdesivr, intaa waad kasii xanuunsan kartaa ama waad dhiman kartaa. Haddii xitaa aad u qaadato remdesivir sidii laguugu qoray si ay u daawayso COVID-19, waxaa weli dhici karta inaad sii xanuunsato ama aad dhimato.

Ka waran haddii aan uur leeyahay ama naasnuujinaayo?
(What if I am pregnant or breastfeeding?)
Way xaddidan tahay qibradda loo leeyahay remdesivir in la siiyo dumarka uurka leh ama hooyooyinka naaska nuujinaaya. Hooyada iyo ubadkeeda oo aan weli dhalan, faa'idooyinka ayka helaayaan remdesivir ayaa ka badan waxyeelooyinka kaga imaan kara daawada. Haddii aad uur leedahay ama aad naasnuujinayso, dhaqtarkaaga kala hadal daawooyinkii kale oo kuu banaan, iyo xaaladdaada gaarka kuu ah.

Sideen usoo wariyaa waxyeelooyinka remdesivir?
(How do I report the side effects of remdesivir?)
Dharqtarkaaga u sheeg isla markiiba haddii aad isku aragto waxyeelooyin ku dhiba ama aankaa baxaynin.

Lasoo socodsii wixii waxyeelooyin ah FDA MedWatch adigoo kalasoo xiriiraaya websaytka www.fda.gov/medwatch ama wac nambarkaan 1-800-FDA-1088.

Sidee warbixin intaan ka badan u baran karaa?
(How can I learn more?)
- Dhaqtarkaaga warayso.
- Booqo http://www.cdc.gov/COVID19
- La xiriir waaxda caafimaadka deegaankaaga ama gobolkaaga.

Waa maxay Emergency Use Authorization (EAU - oggolaanshaha isticmaalka degdegga ah)?
(What is an Emergency Use Authorization (EUA)?)

FDA-da Maraykanka waxay remdesivir diyaar uga dhigtay in si degdeg ah loo isticmaalo iyadoo cuskanaysa EUA. EUA waxaa ku raacsan Wasiirka Adeegga Caafimaadka iyo Dadwaynaha (Secretary of Health and Human Services, HHS) oo caddeeyay inay jiraan xaalado u cudurdaaraya isticmaalka degdegga ee ku saabsan daawooyinka, ama kuwa laga sameeyo waxyaabaha laga helo dhirta iyo xayawaanka inta uu socdo cudur-faafka COVID-19.

Remdesivr ma marin barista ay maraan daawooyinka ay ansaxiso FDA. Waxaa dhici karta in FDA ay bixiso EAU haddii daawada ay qanciso shuruudaha qaar taas oo ka mid ah inaan la heyn daawo kale oo looga kaaftoomo ama la oggolaaday. Taa waxaa dheer, FDa-da go'aankeeda wuxuu ku salaysan yahay wadajirka ku dhisan caddaymaha sayniska oo sheegaaya inay macquul tahay in la aamino inay daawada ay qancisay shuruudaha qaar oo ku saabsan xagga amaanka daawada, waxtarkeeda, iyo faahfaahinta macluumaadkeeda, welibana ay waxtar u leedahay daawaynta bukaanada waqtiyada lagu jiro cudur-faafka COVID-19. Waa in shuruudahaan oo dhan ay la timaaddaa daawadan sidii loogu isticmaalo daawaynta bukaanada qaba COVID-19 intuu socdo cudur-faafkaan.

EUA-da ku saabsan remdesivir wuxuu dhaqan-galkiisa soconaayaa intii uu socdo COVID-19, kaasoo cudurdaar u noqonaaya isticmaalka degdegga ah eee daawooyinkaan ilaa laga joojiyo ama amarkaas laga noqdo (waqtigaas ka dibna daawooyinkaan lama isticmaali karo).